

Ku dhaqan Xafiis D.

Faafinta

Rasmiga ah

الرسمية



الجريدة

Official

Bulletin

EE JAMHUURIYADDA SOOMAALIYA

Sanadka 10aad

Muqdisho, 31 OCTOBER 2023

Lr. 2

Waaxda Maamulka Faafinta Rasmiga ah
Ee Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Dawladda

FAAFIN BILAHA SOO BAXAY

Qiiimaha waa \$XXX Dollar, lambar waliba – **RUKUNKA**: Sanaddii waa \$XXX Dollar, Soomaaliya gudaheeda – Dibaddeedana waa \$XXX Dollar. Rukunka la weydiisto waqtiga loo gooyay wuxuu ka bilaabmaa 1 Janaayo. Qiiimaha Qoritaanku F.R halkii sadar iyo wixii ka yar waa \$XXX Dollar – Rukunka iyo Qoritaanku waxaa la weydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah – Lacagta waxaa lagu bixiniyaa Xafiiska Canshuuraha ee Wasaaradda Maaliyadda.

KOBNIIN

BOGGA KOOWAAD

SHARCI

W.M

BOGGA LABAAD

XEER

BOGGA SEDDEXAAD

TALOOYIN, ISGAARSIIN, OGAYSIIIS, IWM

BILAHA

APRIL - OCTOBER

2023



The Federal Republic of Somalia
Office of the Prime Minister

Tariikh: 11/05/2023

Xeer Ra'iisul Wasaare Lr.128

**XEERKA: SIYAASADDA HAWLGABKA IYO LIILTIRKA SHAQAALAHA
RAYIDKA DOWLADDA.**

Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda JFS;



Markuu arkay: Qodobka 99^{aad} farqadaha (a), (b) iyo (e) ee Dastuurka KMG.

Markuu arkay: Qodobka 100^{aad} farqadaha (a) iyo (d) ee Dastuurka KMG.

Markuu arkay: Soo jeedinta Wasiirka Wasaaradda Shaqada iyo Arrimaha
Bulshada.

Markuu arkay: Go'aanka Shirka Golaha Wasiirrada ee summaddiisu tahay
SHGW.00.31.05.23 ee 11/05/2023, kuna saabsan ansixinta
Siyaasadda Hawlgabka iyo Liiltirka Shaqaalaha Rayidka
Dowladda oo uu Goluhu cod buuxa ku ansixiyay.

Markuu tixgeliyey: Muhiimadda ay leedahay in la meel-mariyo Siyaasadda
Hawlgabka iyo Liiltirka Shaqaalaha Rayidka Dowladda.

Wuxuu Meel-mariyey:

Qodobka 1^{aad}

Go'aanka Shirka Golaha Wasiirrada ee summaddiisu tahay SHGW.00.31.05.23 ee
11/05/2023, kuna saabsan ansixinta Siyaasadda Hawlgabka iyo Liiltirka Shaqaalaha
Rayidka Dowladda oo uu Goluhu cod buuxa ku ansixiyay.

Qodobka 2^{aad}

Waxaa Wasaaradda Shaqada iyo Arrimaha Bulshada loo igmaday fulinta iyo meelmarinta Siyaasadda Hawlgabka iyo Liiltirka Shaqaalaha Rayidka Dowladda.

Qodobka 3^{aad}

Xeerka Siyaasadda Hawlgabka iyo Liiltirka Shaqaalaha Rayidka Dowladda, waxa uu dhaqan-galayaa marka uu Saxiixo Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.



Mudane, *Hamza Cabdi*
Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda JFS

| |
|-------------------------------------|
| JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA |
| XAFIISKA HANTIDHAWRKA GUUD |
| DIRWAAN NO: <i>HAN-068-23</i> |
| TAARIIXH: <i>23-05-2023</i> |
| SAXIIX: _____ |
| <i>AW. Ahmed Isse Gutale</i> |
| Hantidhawraha Guud ee Qaranka |



JAMHURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA

WASAARADDA SHAQADA IYO ARRIMAHA BULSHADA

**SIYAASADDA HAWLGABKA IYO LIILTIRKA
SHAQAALAHA RAYIDKA DAWLADDA**



MUQDISHO -- SOOMAALIYA

2021


TUSMO

XARFAHA LASOO GAABIYEY & QEEXITAANADA MUHIIMKA AH .. ERROR! BOOKMARK NOT DEFINED.

MAHADNAQ 4


YOOKA GUUD EE SIYAASADDA..... 5

| | | |
|-----|--|----|
| 1. | HORDHAC..... | 6 |
| 2. | UJEEKKA SIYAASADDAN | 8 |
| 3. | HADAFYADA GAARKA AH EE SIYAASADDAN WAA IN: | 8 |
| 5. | SOO JEEDINTA SIYAASADDAN..... | 9 |
| 6. | HANNAANKA DIYAARINTA SIYAASADDA HAWLGABKA..... | 10 |
| 7. | NOOCA HAWLGABKA, XADIGGA QAARAANKA & FAA'IDADA DARYEELKA..... | 10 |
| 8. | MAAREYNATA & MAAMULKA SANDUUQA HAWLGABKA | 11 |
| 9. | SIYAASADDA MARXALADDA KALA GUURKA EE QAANTA ADEEGII HORE | 12 |
| 10. | KHARASHKA HIRGELINTA SIYAASADDA HAWLGABKA..... | 12 |
| 11. | XEYNDAAABKA/QAABKA HIRGELINTA (IMPLEMENTATION FRAMEWORK)..... | 13 |
| 12. | DIBU EEGISTA SIYAASADDAN..... | 14 |
| 13. | DHAQANGALKA SIYAASADAN | 14 |
| 14. | Lifaaqa howl-qabadka Siyaasadda | 15 |



Xarfaha Lasoo Gaabiyey & qeexitaanada muhiimka ah

| | |
|---|---|
| DFS | Dawladda Federaalka Soomaaliya |
| XRW | Xafiiska Ra'iisul Wasaaraha |
| WSHAB | Wasaaradda Shaqada iyo Arimaha Bulshada |
| GQSHR | Guddiga Qaranka Shaqaalaha Rayidka Dawladda |
| Qorshe daryeel hawlgab cayiman (<i>a defined benefit pension plan</i>) | Waa qorhse daryeel hawlgab cayiman oo qeexaya daryeelka uu helayo hawlgabaha oo ku saleysan mudada uu usoo shaqeynayey dawladda iyo mushaarka uu helay. |
| Hagbad (<i>Pay As You Go</i>) | Waa nooca qorshe ogolaanayo in qaaraanka la aruuriyo lagu bixiyo daryeelka hawlgabaha/hawlgabyaasha markaas taagan. |
| Guddiga Kor-joogteynta hawlgabka iyo Liiltirka shaqaalaha rayidka ee dawladda | Guddiga loo dhisayo inay galaan ayna kor joogteeyaan sanduuqa daryeelka hawlgabka iyo liiltirka shaqaalaha. |



MAHADNAQ

Anigoo ku hadlaya magaca Wasaaradda Shaqada & Arimaha Bulshada (WSHAB) ee Dawladda Federaalka Soomaaliya (DFS) waxaan jeclahay inaan si xeeldheer uga mahadceliyo Bangiga Aduunka (World Bank), hawlwadeenada Mashruuca Tayeynta Hay'adaha iyo Shaqaalaha dawladda (*Somalia Capacity Injection Project*) iyo qubaradii sida wadajirka ah taageero maaliyadeed iyo mid farsamaba uga geystay diyaarinta siyaasadan.

Waxaan sidaa si lamid ah aanan la ilaabi Karin kaalintii mugga laheyd ee aqoon iyo waayo aragnimaba ku dheehneyd ee ay ka geysteen Guddigii Farsamo oo ka koobnaa xubno kala duwan oo laga soo xulay: *Wasaaradda Shaqada & Arimaha Bulshada, Gudigga Qaranka Shaqaalaha Rayidka, Wasaaradda Maaliyadda, Wasaaradda Qorsheynta, Machadaka Tababarada Sahaqaalaha dawladda iyo Xafiiska Ra'iisul Wasaaraha* oo si dhaw ula shaqeynayey qabiirkii soo diyaariyey siyaasaddan iyo waliba qubaradii Bangiga Aduunka (World Bank) si loo helo siyaasadan baahida aadka ah loo qabay.


Waxaa kale oo aan u mahadnaqayaa dhammaan cid kasta oo si toos ah iyo si dadbanba gacan uga geystay soo diyaarinta siyaasadan.

Md. Duraan Axmed faarax

Wasiirka Wasaaradda Shaqada & Arimaha Bulshada,
Dawladda Federaalka Soomaaliya.

YOOKKA GUUD EE SIYAASADDA

“Yoolka guud ee siyaasadda hawlgabka iyo liiltirka shaqaalaha rayidka ee DFS waa in la helo, la xaqiijiyo lana siiyo shaqaalaha rayidka dawladda daryeel hawlgab iyo liiltir sugan oo ku haboon shaqaala rayidka dawladda kaasoo ah mid la joogteynkaro”



1. Hordhac

Taariikh ahaan, DFS waxay ku shaqyn jirtay **Qorshe Daryeel hawlgab Cayiman**, (*a funded defined benefit pension plan*) sida uu dhigayo Sharci L. 5 ee 31^{ka} Diseember 1969, kaasoo dhaqan-galay 1^{dii} Janaayo 1970. Sida dalal badan oo ka hooseeya lamadegaanka (saharaha) Afrika, DFS Soomaaliya gummaystihii Talyaaniga ayay ka dhaxashay nooca **Qorshaha Daryeel hawlgab Cayiman**. Qorshaas wuxuu bixinayey: *dareyeel hawlgab iyo liiltir, daryeel naafanimo iyo daryeelka qoyska* hawlgabaha markii ay ku timaado geeri. Qorshahaas waxay shaqaaluhu ku tabaruci jireen 6% mushaarkooda taasoo dawladdu ku dari jirtay lacag u dhiganta 4% mushaarkooda asaasiga ah. Qorshahaas hawlgabku wuxuu burburay xiligii ay burburtay dawladii dhexe ee 1991, waxaana lumay dhamaan diiwaannadii ka-faa'iidaystayaasha iyo maal-galintii la sameeyay.

31^{kii} Diseember 1969 dii waxaa la sameeyey sharci L.6 oo ah sharciga hawlgabka iyo liiltirka ciidaamada qalabka sida iyo kuwa ciidan ahaan u habeysan kaasoo dhaqan galay 1^{dii} Janaayo 1970. Sida sharcigan L.6 loo qaabeeyey waxay la mid aheyd sida loo qaabeeyey sharciga L.5 ee hawlgabka iyo liiltirka shaqalaha rayidka ee dawladda, hase yeeshee waxay ku kala duwnaayeen xadigga ama saamiga qaaraanka iyo waliba da'da hawlgabka.

Wasaaradda Shaqada iyo Arimaha Bulshada (WSHAB) ee dawladda Federaalka Soomaaliya markay aragtay baahida weyn ee loo qabo in loogu helo daryeel hawlgab iyo liiltir shaqaalaha rayidka ee dawladda, ayaa iyada oo kaashaneysa mashruuca tayogelinta & dibu-habenyta hay'daha iyo shaqaalaha rayidka dawladda (*Somali Capacity Injection Project*) ee uu gacanta ka gaystay Bangiga Aduunka, waxay diyaarisay soona jeedinaysaa Siyaasaddan Hawlgabka iyo liiltirka shaqaalaha rayidka dawladda.

Siyaasaddan hawlgabka waxay ku saleysantahay **Qorshe Daryeel hawlgab Cayiman** (*a defined benefit pension plan*) gaar ahaan nooca loo yaqaano **"Pay As You Go Scheme"** afka soomaaligana ku noqonkara **"Hagbad"** oo macnaheedu yahay *"Qorshe ogolaanayo in qaaraanka la aruuriyo lagu bixiyo daryeelka hawlgabaha/hawlgabayasha markaas taagan"*. Qorshahan hawlgabka wuxuu la mid yahay qorshihii sharci L.5 1969 kaasoo dhaqangalay 1^{dii} Janaayo 1970.

Go'aanka in la qaato nooca qorshahan hawlgabka lasoo jeediyey ee sare ku xusan, oo u muuqda nooca xulasho ku haboon, oo la joogteyn karo si fududna ay u hirgelin karto

DFS mustaqbalka dhaw, ayaa waxaa laga soo dhiraandhiriyeey talooyin lagu soo jeediyeey warbixin farsamo oo laga diyaariyeey kuna wajahneyd sidii DFS ugu heli laheyd shaqaalaha rayidka xulasho qorshe daryeel hawlgab iyo liiltir ku haboon, taa soo si wadajir ah Guddiga Farsamada ee ay hogaaminaysay WSHAB ee DFS iyo kubaro ka socotay Bangiga Aduunka (World Bank) iyo dhamaan hay'daha kale ee dawladda oo ay khuseysayba ay ka gaysteen talooyin wax ku ool ah.

Hadda ma jiro sharci hawlgab ah oo u shaqaynaya shaqaalaha rayidka DFS kaasoo siinayana daryeel hawlgab iyo liiltir inkastoo la sameeyey dadaalo oo ay dawladdu ku doonaysay soo noolaynta qorshahii hore ee daryeelka shaqaalaha rayidka, hadana ma noqon mid guulaysta maadaama aanay jirin dhaqaale lagu fuliyo qorshihii hore. Abaabulka khayraadka oo hooseeya iyo dhaqaalaha dawladda oo aan hormarsaneyn ayaa dakhliga soo gala dawladda waxaa loo isticmaalaa kharashaadka hawl fulinta dawladda.

Maqnaanshaha siyaasad hawlgabka shaqaalaha rayidka iyo sharci jaangoynaya qorshaha hawlgab iyo liiltirka waxay dawladda iyo shaqaalaha rayidka ee hawlgabay ku qasabtay inay shaqada ku sii jiraan xataa marka ay dhaafaan da'da hawlgabka, maadaama aysan heli Karin dhaqaale kale oo ay u baxsadaan markay ka fariistaan ama ka tagaan shaqada DFS.

Burburkii dawladda ee 1991 oo galaftay diwaanadii qorshahii hawlgabka iyo hantidiisiiba waa arin ay dawladdu ku baraarugsantahay, waxayna u darban tahay iska ilaalinta wixii cilado ah ee uu lahaa qorshihii daryeelka hawlgabka iyo liiltirak ee Sharci L. 5 ee 1969. Ayaa siyaasadani waxay soo jeedinaysaa in DFS sameyso Guddi soo baara soona hubiya warbixina kasoo siiya dawladda inay jiraan wax diiwaano ama hanti ah oo la heli karo ama la raadraaci karo ee uu lahaa qorshihii hore ee hawlgabka.

Mar haddii ay hadda dakhli ururintii iyo miisaaniyaddii dawladdu dib usoo hagaagayso ayna jiraan dadaalo lagu xoojinayo amniga iyo dibu habeynta maamulka guud ee hay'daha iyo shaqaalaha rayidka dawladda, waxaa dawladda ka go'an inay hirgaliso siyaasad iyo Sharci hawlgab si shaqaalaha rayidka dawladda u helaan qorshe daryeel oo la joogteyn karo kuna haboon xiliga hawlgabnimada.

Siyaasadan Howlgabka iyo Liiltirka Shaqaalaha Rayidka waxay dawladda u suurta galinaysaa inay dib u asaasto barnaamijka daryeelka shaqaalaha rayidka dawladda iyadoo waxa ka badal iyo casriyeeyn lagu sameynayo sharci L.5 ee 1969 kaasoo loo soo

gudbin doono golaha wasiirada kadibna loo gudbin doono baarlamaanka si uu u ansixiyo.

2. Ujeedka Siyaasaddan

Siyaasaddan waxay ka duulaysaa baahida loo qabo nidaam isku-qoofalan oo la tacaala mushkiladaha kor ku xusan keenana qaab loo asaaso loona hirgaliyo qorshe hawlgab. Waxaa kale oo uu nidaamkaasu wax ka qabanayaa wixii lagu mutaystay adeegii/shaqadii horay loo qabtay maadaama ay jiraan qaar da'dii hawlgabka gaaray welina sii shaqaynaya.

3. Hadafyada Gaarka ah ee Siyaasaddan waa in:

- 3.1 Shaqaalaha rayidka dawladda ee gaaray da'da hawlgabka loo xaqiijiyo loona helo daryeel hawlgab iyo liiltir sugan.
- 3.2 Daryeel la siiyo qoysaska ay ka geeriyoodaan shaqaalaha rayidka hawlgabka.
- 3.3 Shaqaalaha hawlgabka ah loo sameeyo qorshe lagaga sagootinayo shaqada rayidka lana yareeyo khatarta ah in iyagoo nool ay ka dhammaato wixii ay ku noolaan lahaayeen.
- 3.4 La abuuro tab dhaqaale ahaan loo joogtayn karo oo shaqaalaha hawlgabka ah iyo kuwa ku tiirsan lagu siin karo daqli hawlgab oo daah furan si joogto ahna looga warbixin karo kuwa ay khusayso oo ay ka mid yihiin dawladda, baarlamaanka, shaqaalaha rayidka, samatabaxayaasha iyo dadwaynaha Soomaaliyeedba.
- 3.5 La fudaydiyo sidii lagu bixin lahaa adeegga iyo dareyeelka hawlgabka si hufan oo sax ah.
- 3.6 Sameynta siyaasadani waxaa hagaya baahida loo qabo in DFS ay bixiso daryeel hawlgab sugan oo ay helaan:
 - b) Shaqaalaha rayidka dawladda ee hadda shaqeeya iyo kuwa mustaqbalka marka ay gaaraan da'da hawlgabnimada;
 - t) "**Qaanta adeegii hore**" ee shaqaalaha rayidka dawladda ee gaaray da'da hawlgabka walina hadda ku jira shaqada dawladda.

- 3.7 j) in dhalinyarada soomlaaliyeed ee da'da yar waxna bartay looga abuurto fursado shaqo adeega guud ee hay'adaha dawladda

4. Seeraha Siyaasadan.

Siyaasaddan waxaa lagu dabbakhayaa oo ay daboolaysaa dhammaan shaqaalaha rayidka dawladda DFS ee rasmiga ah, marka laga reebo kuwa leh sharci kale ee hawlgab ah ee u gaar ah sida ciidamada qalabka sida iyo kuwa ciidan ahaan u habeysan.

5. Soo jeedinta Siyaasaddan

Iyadoo laga duulayo baahida loo qabo in sida ugu dhaqsiiyaha badan loo helo siyaasad iyo sharci lagu maareeyo daryeelka hawlgabka iyo liiltirka shaqaalaha rayidka dawladda, ayaa waxay siyaasaddan soo jeedinaysaa arimaha soo socda:

- 5.1 In wax ka bedel lagu sameeyo lana casriyeeyo sharcigii hore L. 5 ee 1969 ee hawlgabka iyo liiltirka shaqaalaha rayidka dawladda.
- 5.2 In da'da hawlgabka shaqaalaha rayidka dawladda noqoto 65 sano rag iyo haweenba.
- 5.3 In sidoo kale la sameeyo xeer hoosaadyo faahfaahsan si loo dhaqan galiyo sharica hawlgabka iyo liiltirka marka dibu habeyn lagu sameeyo lana ansixiyo.
- 5.4 In laga aasaaso Wasaaradda Maaliyadda "**Waax**" maamusha sanduuqa hawlgabka ee shaqaalaha rayidka dawladda.
- 5.5 In la aasaaso **Guddi Kor joogteeya** maamulka iyo guud ahaan arrimaha sanduuqa hawlgabka.
- 5.6 Marka loo baahdo in maalgelin lagu sameeyo hantida kaydka sanduuqa hawlgabka, siyaasadan waxay usoo jeedinaysaa dawladda in hay'adaha ay khuseyso ee maamula sanduuqa hawlgabka inay soo diyaariyaan siyaasad iyo xeer faahfaahsan ayna meelmariyaan golaha xukuumadda iyo golayaasha baarlamaanka oo u ogolaanayo in kaydka sanduuqa hawlgabka uu maalgashi sameeyo.
- 5.7 In la aqoonsado "**Qaanta adeegii hore**" ee ay dawladdu ku leeyihiin shaqaalihii hore ee qaaraanka looga jari jiray sharcigii hawlgabka ee *L.5 1969*

wixii ka horeeyey 1991 haddii ay la yimaadaan caddeymo ku filan muddo sadex (3) sano gudaheed oo ka bilaabanaysa marka uu dhaqan gal noqda wax kabadelka sharci L.5 1969 ee ay siyaasadani soo jeedineyso.

6. Hannaanka Diyaarinta Siyaasadda Hawlgabka

- 6.1 Diyaarinta siyaasaddani waxay ku qotontaa kadib markii la sameeyey daraasad, warbixino iyo talo soojeedino ku saabsan baahida loo qabo helidda qorshe daryeela hawlgabka shaqaalaha rayidka dawladda kaa soo uu sameeyey khabiir madax banaan gacanna ka helayo khubarada Bangiga Aduunka iyo sidoo kale Gudigga Farsamo ay u xilsaartay WSHAB oo ka kala socday hay'adaha dawladda ee ay khusaysay.
- 6.2 Hannaanku wuxuu bilaabmay wadatashiyo ay ka qayb-qaadanayeen madax sare oo dawladda ah oo ay hogaaminayaan wasiiro iyo saraakiil iyo lataliyeyaal sare ka socday hay'adaha dawladda ee ay khuseysay. iyo warbixintii farsamo ee uu sameeyey lataliyaha madaxbannaan iyo talooyinkii laga helay intii lagu guda jiray wadatashiyadii baaxadda lahaa ayaa la isku geeyey laguna qaabeeyey jaangooyada siyaasaddan hawlgabka.
- 6.3 Hannaanka sameynta siyaasaddan waxaa kale oo lagu ku biiriyay qoraalo kale duwan oo laga qoray ama laga soo xigtay siyaasadaha hawlgabka ee dalalka soo koraya gaar ahaan kuwa muslimka ah. Sidoo kale, waxaa kale oo la tixgaliyay waaya-aragnimada baaxadda leh ee laga helay dalalka Soomaaliya la asaagga ah ee soo maray waayo la mida kuwa DFS.
- 6.4 Sidoo kale sameynta siyaasaddan waxaa talooyin wax ku ool ah iyo gacanba ka geystay Guddiga Farsamada dawladda ee ay WSHAB u xilsaartay iyagoo la kaashanayey dhamaan hay'adaha dawladda ee ay khuseysay.

7. Nooca Hawlgabka, Xadigga Qaaraanka & Faa'iidada Daryeelka

- 7.1 Siyaasadda hawlgabka shaqaalaha rayidka dawladda waxa ay noqonaysaa "***Qorhse daryeel cayiman oo qeexaya daryeelka uu helayo hawlgabaha***" (*Defined Benefit Pension Plan*) gaar ahaan nooca loo yaqaano "***Hagbad***" (***Pay As You Go Scheme***) kaasoo ah "***nooc qorshe ah oo ogolaanayo in qaaraanka la aruuriyo lagu bixiyo daryeelka hawlgabaha/hawlgabayasha markaas taagan***" waana

sida uu qabay *sharciga hore L.5 1969* ee hawlgabka iyo liiltirka shaqaalaha rayidka dawladda.

- 7.2 Qof kasta oo ka mid ah shaqaalaha rayidka rasmiga ah ama joogtada ah ee dawladda waxa uu ku biirinayaa sanduuqa hawlgabka (*Pension Fund*) xaddi lacageed oo ah shan boqolkiiba (**5%**) mushaarkiisa asaasiga ah.
- 7.3 DFS waxay sidaa si la mid ah ugu biirinaysaa sanduuqa hawlgabka (*Pension Fund*) xaddi lacageed oo ah boqolkiiba afar (**4%**) mushaarka asaasiga ee qof kasta oo ka mid ah shaqaalaha rayidka dawladda ee joogtada ah.
- 7.4 Daryeelka hawlgabka ee uu leeyahay hawlgabaha waxaa lagu jaangoynayaa ama lagu xisaabinayaa qaacidada ah xadiga **1/800th** ee mushaarka asaasiga ah ee bilkasta oo loo dhameystirayo adeega sida uu qeexayo isbedelka sharciga L.5 1969.
- 7.5 Daryeelada kale ee la siinayo hawlgabka sida lagu qeexayo isbedelka sharci L.5 ee 1969 waxay noqonayaan kuwa soo socda:
 - b) Daryeelka u harayaasha (*survivor benefits*);
 - t) Liiltirka qofka shaqada ku geeriyooda (*death benefit*);
 - j) Daryeelka Naafanimo (disability benefit);

8. Maareynta & Maamulka Sanduuqa Hawlgabka

- 8.1 Sanduuqa daryeelka hawlgabka iyo liiltirka ee la dhisayo waxaa maamulaya Wasaaradda Maaliyadda oo u abuuri doonta "**Waax**" u gaar ah oo u xilsaaran maareynta hawl maalmeedka, socodsiinta, bixinta daryeelka iyo liiltirka hawlgabka lana shaqeyn doonta dhammaan haydaha dawladda ee ay khuseeyso.
- 8.2 Guddiga Qaranka Shaqaalaha Rayidka ee dawladda (GQSHR) ayaa u xilsaaran keydinta iyo haynta xogta galalka shaqaalaha hawlgabka ee dawladda, waxayna si dhaw ula shaqeyndoonaan "**Waaxda**" u xilsaaran Wasaaradda Maaliyadda sanduuqa hawlgabka.
- 8.3 Guddiga Qaranka Shaqaalaha Rayidka wuxuu u xilsaaran yahay diyaarinta iyo hubinta liiska shaqaalaha rayidka ah ee uga baxaya shaqada dawladda hawlgabnimo ama ruqso darteed si loo xaqiijiyo ka saaridda shaqaalaha ceynkaan ah diiwaanka guud ee shaqaalaha dawladda.
- 8.4 Isbedelka Sharci L.5 ee 1969 ee hawlgabka iyo liiltirka shaqaalaha rayidka wuxuu dhisayaa "**Guddi Kor Joogteyn ah**" oo la socon doona maamulka iyo guud ahaan arimaha sanduuqa hawlgabka.
- 8.5 Kaalinta "**Guddiga Kor joogteynta**" waxaa lagu faahfaahin doonaa isbedelka sharci L.5 ee 1969 iyo xeer hoosaadyadiisa.

8.6 Guddiga Korjoogteynta maamulka arimaha hawlgabka iyo liiltirka ee lagu asaasayo isbedelka sharci L. 5 wuxuu u warbixinayaa Ra'iisul Wasaaraha DFS isagoo mas'uul uga ah la socodka arimaha sanduuqa hawlgabka ee shaqaalaha rayidka dawladda.

9. Siyaasadda Marxaladda Kala guurka ee Qaanta Adeegii Hore

- 9.1 Siyaasadani waxay aqoonsantahay jiritaanka shaqaalaha dawladda Soomaaliya ee qaaraan hawlgab ah ku bixin jiray ka hor 1991 sanduuqa hawlgabka iyo liiltirka ee sharci L. 5 laga soo bilaabo 1^{dii} Janaayo 1970.
- 9.2 Siyaasadani waxaa kale oo ay aqoonsantahay adeegii hore ee shaqaalaha rayidka dawladda ay bixiyeen inta aan la sameyn siyaasaddan hawlgabka.
- 9.3 Siyaasadani waxay soo jeedinaysaa in la aqoonsado lana bixiyo qaanta ka dhalatay ama ka dhalanaysa adeegii hore ee shaqaalaha sida uu faahfaahinayo isbedelka Sharci L. 5 1969 ee hawlgabka iyo liiltirka shaqaalaha rayidka.
- 9.4 Isbedelka sharci L.5 1969 wuxuu bixin doonaa daryeel hawlgab iyo liiltir oo ay helaan dhamaan shaqaalaha rayidka dawladda.

10. Kharashka Hirgelinta Siyaasadda Hawlgabka

- 10.1 Maalgelinta sanduuqa hawlgabka iyo liiltirka waa waajib qaaraan oo saaran shaqaalaha iyo dawladda, kuwaa soo sanduuqa hawlgabka ku biirin doona xadi qaaran oo mucayin ah sida lagu xusay qodobada kore ee 6.2 iyo 6.3 sidaa si la mid ahna uu tilmaami doono isbedelka sharci L.5 1969.
- 10.2 In Wasaaradda Maaliyaddu hirgeliso bilowdana fulinta qaaraanka sanduuqa hawlgabka iyo liiltirka shaqaalaha rayidka sida lagu jaangooyey isbedelka sharci L.5 1969 marka la ansixiyo, ayna lana bilowdo qaaraanka sanduuqa 1^{da} Janaayo 2022 uuna noqdo mid laga arki karo miisaaniyadda dawladda 2022.
- 10.3 Wasaaradda Maaliyadda iyada oo kaashanaysa GQSHR waxay soo diyaarindoontaa liiska shaqaalaha rayidka ah ee hawlgabka ah 31^{ka} December 2021 oo dhameystiran si miisaaniyadda daryeelkooda hawlgabnimo iyo liiltirba loogu talagalo laguna daro miisaaniyad sanadeedka guud ee dawladda ee 2022 islamarkaana la xaqiijinayo hawlgabayaasha si rasmi ah looga saaro diiwaanka guud ee shaqaalaha rayidka 31^{ka} December 2021 iyadoo loo xaqiijinayo in

shaqaalaha hawlgabka galay ay helayaan daqli bileed ku aadan daryeelkooda hawlgabnimo laga bilaabo 30^{ka} Janaayo 2022.

- 10.4 Wasaaradda Maaliyadda iyada oo kaashaneysa GQSHR waxay sidoo kale ay soo diyaarin doontaa liiska shaqaalaha rayidka ee hawlgabka galay ama galaya mudada u dhaxeysa 31^{ka} December 2021 ilaa 31^{ka} December 2026, si dawladdu usii ogaato uguna xisaabtanto miisaaniyadda uu u baahan yahay *sanduuqa hawlgabka daryeelka shaqaalaha* rayidka dawladda mudadaa la sheegay.

11. Xeyndaabka/Qaabka Hirgelinta (Implementation Framework)

11.1 Xeyndaabka/qaabka Shaqo ee Hay'adaha

- 11.1.2 Dastuurku wuxuu dhammaan shaqaalaha rayidka dawladda ee hawlgabka noqda u damaanad qaadayaa xuquuq daryeel hawlgab ah.
- 11.1.3 Dawladda waxaa ka go'an hirgalinta ujeedooyinka siyaasadda iyo istaraatiijiyadaha lagu xaqiijinayo in siyaasaddu suurta galiso daryeelka hawlgabka kuwa ka fariistay shaqada dawladda ayna soo jiidato/ haysatana shaqaalaha leh aqoon iyo xirfad looga baahan yahay adeegga guud ee dawladda.
- 11.1.4 Wasiirka Shaqada & Arimaha Bulshada, wuxuu golaha wasiirada uso jeedinayaa dhisidda ***Guddiga Kor joogteynta Sanduuqa Daryeelka Hawlgabka iyo Liiltirka*** oo lagu asaasi doono isbedelka sharci L.5 1969, kuwaa soo lahaan doono awoodda kor joogteynta sanduuqa hawlgabka iyo ka shaqeynsiintiisa sida lagu tilmaamay isbedelka sharci L.5 1969 marka la ansixiyo.
- 11.1.5 Si ay u dhaqan gasho siyaasadan, isbedelka sharci L.5 ee daryeelka hawlgabka iyo liiltirka shaqaalaha rayidka dawladda iyo xeer hoosaadyadiisa waxay tilmaami doonaan tabta iyo habraacyada maamulka iyo maareynta daryeelka hawlgabka iyo liiltirka shaqaalaha rayidka dawladda.

11.2 Kormeerka iyo Qiimaynta Fulinta Siyaasadda

- 11.2.3 Waaxaa la diyaarin doonaa xeyndaab kormeer iyo qiimeyn oo lagu cabiro wixii hawlqabadka iyo horumar laga sameeyo fulinta siyaasaddan.

11.2.4 Qorshaha hirgelinta sida lagu faahfaahiyey shaxda hoose ee 13.1 ayaa noqon doona xeyndaab loo isticmaali doono warbixinta joogtada ah ee hirgelinta siyaasaddan.


11.2.5 Guddiga korjoogteynta sanduuqa hawlgabka wuxuu soo saari doonaa warbixin sanadle ah oo ku aadan kormeerka iyo qiimeynta sanduuqa hawlgabka isagoo la wadaagi doona Xafiiska Madaxweynaha, Ra'iisulwaasaraaha iyo aqalada Baarlamaanka ee JFS.

12 Dibu eegista Siyaasaddan

Siyaasaddan waxaa dib u eegis lagu sameynayaa shantii (5^{tii}) sanaba mar, ama marka ay hay'adaha masuuliyadaas leh iyagoo tixgalinaya duruufo dhaqaale-bulsho ay soo jeediyaan in dibu eegis la sameeyo.

13 Dhaqangalka Siyaasaddan

Siyaasadda sanduuqa halwgabka ee daryeelka iyo liiltirka Shaqaalaha Rayidka Dawladda iyo lifaaqeedu waxay dhaqan galayaan marka ay Golaha Wasiirada ansixiyaan, laguna soo saaro Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.



Lifaaqa Shaxda fulinta hawlaha qorshaha Siyaasadda

| Yoolka/Hadafyada | Hawlaha | Tilmaanta Xaqiijinta hawlaha | Cidda ka mas'ulka hawlaha | Waqtiga kama danbeysta ee u go'an |
|--|--|---|---|-------------------------------------|
| 1. Helidda sharci hawlgab iyo Liiltir ee shaqaalaha rayidka dawladda oo la meel mariyey. | <ul style="list-style-type: none"> ▪ Dib u eegis iyo wax ka bedel ku sameynta sharci L.5 1969 oo ahaa sharcigii hawlgabka shaqaalaha rayidka dawladda. | <ul style="list-style-type: none"> ▪ Sharciga hawlgabka iyo liiltirka shaqaalaha rayidka L.5 1969 oo dibu eegis iyo casriyey lagu sameeyey lana horgeeyo golaha wasiirada. | <ul style="list-style-type: none"> ▪ Wasaaradda Shaqada & Arimaha Bulshada oo kaashaneysa qeybaha ay khuseysa sida Wasaaradda Maaliyadda iyo Guddiga Qaranka Shaqaalaha Rayidka. | Janaayo 20 ^{keeda} , 2021 |
| 2. Helidda Waax u dhisan Wasaaradda Maaliyadda oo maamusha sanduuqa hawlgabka. | <ul style="list-style-type: none"> ▪ In Wasaaradda Maaliyadda laga dhiso Waax u gaar ah maamulka sanduuqa daryeelka hawlgabka. | <ul style="list-style-type: none"> ▪ Waax dhisan oo leh xafiisyo iyo shaqaale oo maamusha sanduuqa daryeelka hawlgabka. | <ul style="list-style-type: none"> ▪ Wasaaradda Maaliyadda. | Janaayo 30 ^{keeda} , 2021. |
| 3. Helidda Guddiga kor joogteynta sanduuq hawlgabka. | <ul style="list-style-type: none"> ▪ Dhisidda Gudigga kor joogteynta sanduuqa hawlgabka. | <ul style="list-style-type: none"> ▪ Wareegto Ra'iisul Wasaare oo lagu magacaabay xubnaha Guddiga kor joogteynta sanduuqad hawlgabka. | <ul style="list-style-type: none"> ▪ WSHAB iyo XRW. | Janaayo 30 ^{keeda} , 2021. |
| 4. Helidda Koonto Bangiga dhexe ee uu lahaado sanduuqa hawlgabka. | <ul style="list-style-type: none"> ▪ In Banggiga Dhexe laga sameeyo koonto lagu keydiyo lagana maamula sanduuqa hawlgabka. | <ul style="list-style-type: none"> ▪ lumber koonto oo ka furan Bangigga Dhexe oo la xaqiijin karo inuu leeyahay Sanduuqa hawlgabka. | <ul style="list-style-type: none"> ▪ Wasaaradda Maaliyadda oo kasshaneysa Guddiga Korjoogteynta Sanduuqa hawlgabka. | Maarso 15 ^{keeda} , 2021. |
| 5. Helidda saadaasha miisaaniyadda sanduuqa hawlgabayaasha 2022 - 2026 | <ul style="list-style-type: none"> ▪ Diyaarinta saadaasha miisaaniyad tilmaameysa dhaqaalaha uu u baahan yahay sanduuqa hawlgabka 1^{da} Janaayo 2022 – 31^{ka} December 2026. ▪ Diyaarinta liiska shaqaalaha rayidka ee hawlgabka ah (pension payroll) ee laga fariisinayo shaqada dawladda laga bilaabo December 31^{ka} 2021 illaa December 31^{ka} 2026. | <ul style="list-style-type: none"> ▪ Warbixinta saadaasha miisaaniyadda sanduuqa daryeelka shaqaalaha hawlgabayaasha 2022 – 2026. ▪ Liiska shaqaalaha rayidka ee hawlgabka ah (pension payroll) ee laga fariisinayo shaqada dawladda laga bilaabo December 31^{ka} 2021 illaa December 31^{ka} 2026. ▪ Miisaaniyadda | <ul style="list-style-type: none"> ▪ Waasaaradda Maaliyadda oo kaashaneysa Guddiga Qaranaka ee shaqaalaha Rayidka dawladda iyo wasaaradda Shaqada & Arimaha Bulshada. | Maarso 30 ^{keeda} , 2021. |

| | | | | |
|---|---|--|--|---------------------------------------|
| | <ul style="list-style-type: none"> Ku darista miisaaniyad sanadeedka guud ee dawladda 2022 misaaniyadda daryeelka hawlgabayaasha shaqada laga fariisinayo 31^{ka} December 2021. | <p>Guud ee dawladda 2022 inay ka muuqato miisaaniyadda loogu tala galay daryeelka hawlgabayaasha shaqada laga fariisinayo 31^{ka} December 2021.</p> | | |
| 6. Helidda xeerhoosaadka sharciga daryeelka hawlagabka | <ul style="list-style-type: none"> Diyaarinta xeer hoosaadyada lagu fulin doona sharci L.5 marka wax ka bedelka lagu sameeyo lana ansixiyo. | <ul style="list-style-type: none"> Xeer hoosaadyo iyo habraacyo dhameystiran oo faahfaahsan. | <ul style="list-style-type: none"> WSHAB oo kaashaneysa mashruuca tayeynta hay'adaha iyo shaqaalaha dawladda. | May 30 ^{keeda} , 2021 |
| 7. Helidda nidaam elektaroonic oo xog-keydin ah (database system) | <ul style="list-style-type: none"> Sameynta nidaam electronic (database system) lagu maamulo sanduuqa hawlgabka iyo liiska hawlgabayaasha (pension payroll). | <ul style="list-style-type: none"> Nidaam electronic oo xog keydin ah (database system) oo shaqeynaya. | <ul style="list-style-type: none"> WSHAB iyo Guddiga Kor joogteynta maamulka sanduuqa hawlgabka oo kaashanaya mashruuca tayeynta hay'adaha iyo shaqaalaha dawladda (<i>Somalia capacity injection Project</i>). | Juulyo 30 ^{keeda} , 2021. |
| 8. Helidda tababaro iyo aqoon kororsi. | <ul style="list-style-type: none"> Tayeynta iyo siinta tababaro, khibrad iyo aqoon kororsi shaqaalaha ku lugta leh maamulka iyo hawlaha fulinta sanduuqa hawlagabka. | <ul style="list-style-type: none"> Cadeymaha tirada Shaqaalaha sida khaaska ugu lugta leh ah looguna tababary loona siiyey khibrad iyo aqoon kororsi inay maamulaan sanduuqa hawlgabk. ah oo u tababaran gudashada hawlaha maamulka sanduuqa hawlgabka. | <ul style="list-style-type: none"> WSHAB iyo Guddiga Kor joogteynta maamulka sanduuqa hawlgabka oo kaashanaya mashruuca tayeynta hay'adaha iyo shaqaalaha dawladda (<i>Somalia capacity injection Project</i>). | Agoosto 30 ^{keeda} , 2021. |
| 9. Helidda agab xafiiseed. | <ul style="list-style-type: none"> In la siiyo agab xafiiseed iyo qalab ku filan Waaxda maamulka sanduuqa hawlgabka ee Wasaaradda Maaliyadda. | <ul style="list-style-type: none"> Nooca iyo tirada gab xafiiseedka laga gaday lana siiyey waaxda maamulka sanduuqa hawlgabka ee Wasaaradda Maaliyadda. | <ul style="list-style-type: none"> WSHAB iyo Guddiga Kor joogteynta maamulka sanduuqa hawlgabka oo kaashanaya mashruuca tayeynta hay'adaha iyo shaqaalaha dawladda (<i>Somalia capacity injection Project</i>). | September 30 ^{keeda} , 2021. |